

Xaqiiq ku Saabsan Furuqa (Smallpox)

Smallpox

Qatar intee la eg ayaa ka imaan karta furuqa?

Furuqa oo ay calaamadahiisu ka mid yihiin qandho iyo cun cun nooc kale ah oo jirka ka galo qofka, ayaa wuxuu mar ahaan jirey cudurrada ugu daran ee halista ku ahaa caafimaadka aadanaha soo wajaha. Furuqa oo uu keeno fayrus, waxaa caadi ahaan ugu dhiman jirtay saddex meelood meel dadka uu cudurku ku dhaco.

Si kastaba ahatte, 1980kii ayaa waxaa la xaqiijiyay in la dabar jaray furuqa isla markaasna uusan halis ku ahayn caafimaadka aadanaha, waxaana taa mahad ku leh Ururka Caafimaadka Addunka oo olole xoog leh ku qaaday dabar jarida cudurkaan- Kiiski ugu dambeeyey ee la ogyahay ee meel aduunyada ka mid ah lagu arkay- ayaa waxaa la diiwaan geliyey inla helay dhammaadkii 1970. In kastoo aan la og yahay in xayawaanka oo dhan inuu aadanaha uun yahay midka keliya ee qaada ama faafiya furuqa, halista ka imaan karta inuu cudurka kugu dhaco waxaa laga dhigay eber.

Nasiib darrose, furuqu ma aha cudur gebi ahaan laga soo gudbay. Kaddib markii cudurka la tirtiray, waxaa dhacday in waxxoogaa fayruskii ka mid ah sheybaarrada lagu reebay si halkaas oo keliya loogu isticmaalo - waxaana hadda jirto sababo sheegayo in isticmaalka fayruska loo jiheeyey in hub ahaan loo isticmaalo. Fursadaha uu furuqu mar kale cudur ahaan ugu dilaaci karo, iyadoo si ula kac ah fayruska loo sii deynayo si uu cudur u dhaliyo ayaa hadda u muuqaata iney tahay arrin dhaci karta. Waxaa la aaminsan yahay in ey aad u hooseysa fursadaha ay argagixiso furuqa u isticmaali karto hub ay ku dagaal galaan. Laakiin, hadii

uu weerar noocaas ahi dhaco waxa ka imaan kara -ayaa waxay noqoneysaa arin aad qatar u ah.

Maxey yihiin astaamaha furuqa lagu yaqaano?

Astaamaha furuqu waxey ku bilaabmaan qandho aad u saraysa, madax iyo jir xanuun iyo, mararka qaarkood, mantag. Laba ama affar cisho kaddib waxaa soo baxaya nabro. Nabruhu ntey kuuskuusmaan ayey jirka oo dhan ku faafayaan iyagoo u eg soobaxyo qolof leh. Saddex usbuuc kaddib qolofii ayaa soo dhacaysa, waxaana si weyn u muuqanaya boogo duleelo leh.

Markuu kugu dhaco, imesay qaadaneysaa inuu furuqu kugu sii faafo? Waana goorma marka aad adigu cudurka qabadsiiin kareysid dad kale?

Marka uu cudurku qof ku dhaco, astaamaha ugu horreya ee furuqa lagu garto waxey soo ifbaxaan qiyaasti 12-14 cisho kaddib. Inkastoo mararka qaarkood uu cudurku ku soo muuqan karo qiyaastii inta u dhaxeysa ugu yaraan 7 cisho illaa 17 cishood. Mar haddey calaamadaha ugu horeeya ee furuqu soo ifbaxaan, qofku aad ayuu sanuunsadaa isagoo awoodi kari weynaya inuu qabsado hawladii caadiga u ahaa. Bukaanku cudurka qof kale uma gudbin karo-oo weli awood uma laha inuu cudurka qof kale u gudbiyo- illaa ay nabruhu soo muuqdaan.

Waa sidee is qabadsiiinta furuqa?

Furuqa waa cudur la is qabdsiiyo, laakiin uma fududa sida laysku qabdsiiyo cudurrada ay aay ka mid yihiin dureyga iyo hargabka ama jadeecada . Sida caadiga ah furuqu waxaa uu ku fidaa iska soo horjeed mudo dheer qaata oo qof buka iyo qof caafimaad qaba ay sameeyaan – sida dad meel wada deggan oo kale – Waxaa kaloo cudurka la iskugu gudbin karaa marka

Smoali



Communications Office
625 North Robert Street
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
(651) 201-4989
www.health.state.mn.us

Xaqiiq ku Saabsan Furuqa (Smallpox) - 2

dadku dhacaankoodu is gaaro, ama isku sariir iyo dhinsoolo la wada isticmaalo. Waxaa kaloo laysku qabadsiiyaa hawada dhismayaasha lagu wada noolyahay, balse middaan ma aha mid caadi u dhacda.

Furuqa daweyn ma leeyahay?

Lama hayo wax kaa daaweeya furuqa. Laakiin waxaa looga hor tegi karaa istallaalid.

Tallaalku wuxuu cudurka kaa difaaci xitaa dad uu feyruska furuqa jirkooda galay. . Inkastoo uusan jirin tallaalku ku siineynin difaac kaamil ah, haddana difaaca aad ka heleysid tallaalkan adigoo cudurku uu ku hayey saddex cisho wuxuu la mid yahay difaaca uu yeelan lahaa qofka laga tallaalay cudurka *ka hor* intuuusan cudurku ku dhicin. Tallaalka la qaato 7 cisho gudohood markuu furuqa kugu dhacay, waxey yareynesaa awooda xanuunada kale ee ka imaan kara furuqa kugu dhacay dartiis.

Laakiin, tallaalku wuxuu la imaan karaa qatar halis ah, wuxuuna ku ridayaa dadka qaarkiis xasaasiyo ay u geeriyoodaan., marka waxaa quman in la isbarbar dhigo faa'iidada iyo halista uu tallaalku leeyahay. *Ugu yaraan* tallaalaahi, uu hal qof u dhimanaayo tallalka-measha 15 kalena ay si aad u xun ugu jirran doonaan tallaalka Laakiin ilaa uu qof furuqa ka dhigto hub lagu dagaal galo ma ahane, qatarta aad ugu jirtid in uu furuq kugu dhaco waa eber.